KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Muqdisho 1dii Agosto 1973 L. 15

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 8 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 19 Luuliyo 1973 — *Toosin Sharciga L. 66 taariikh 29 Oktobar 1972.* Bog. 259

SHARCI L. 9 GUDDONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 19 Luuliyo 1973 — *Ciribtirka Fasaadka.* » 260

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 24 Abrile 1973 — *Magacaabid Garsooreyal. L. 78.* » 263

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 18 Junyo 1973 — *Dhismo Safaarooyin Cusub. L. 79.* » 266

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 23 Junyo 1973 — *Dallacsiin Gaashaanle Dahir Moxamed Diriye. L. 80.* » 267

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH


WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Junyo 1973 —
*Naada Dhul, Jaalle Qaali Jaamac Moxamed L. 114.* Bog. 269

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Junyo 1973 —
*Naada Dhul, Jaalle Nakua Aden Carale. L. 115.* » 269

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Junyo 1973 —
*Naada Dhul Jaalle Axmed Moxamed Aden. L. 116.* » 270

MAXKAMADDA GOBOLKA BENADIR, 28 Luuliyo 1973
*Dhumidii bugga Lacagta Jaalle Moxamed Xaaji Cali. L. 117.* » 270

MAXKAMADDA GOBOLKA BURCO 9 Luuliyo 1973 —
*Jeega fareega ee dhumay, Jaalle Moxamed Xussen Cilmi. L. 118.* » 271

MAXKAMADDA GOBOLKA BURCO 5 Juunyo 1973 —
*Dhumid Buugga lacagta, Jusuf Moxamed Aden. L. 119.* » 271

**SHARCI L. 8 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 19 Luuliyo 1973.**

**Toosin sharciga L. 66 Taariikh. 29 Oktobar 1972.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO TIX GELINAYAA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ta Xoghayayasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Guddiga Qoraalka lagu tilmaamay qodoka ee Sharciga L. 66 ee soo baxay 29kii Oktobar 1972, wuxuu awooddiisa xagga qoraalka ku wareejinayaa Guddiga Nabadgelyada iyo Siyaasadda ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, haddii shaqaalaha la qorayaa ay yihiin Shaqaalaha Hoose (subordinate Staff) kuwaass oo ay ka mid yihiin adeege, ilaaliye iwm ah, ha ahadeen Shaqaalahaasu kuwa loo qorayo Wasaaradaha Xafisyaalka Dawladda, Wakaaladaha, Sharikadaha, Safaaradaha ajnebiga ah, Hay'adaha qanuunka ka dhexeeya iwm.

Qodobka 2aad

Dawladda Hoose ee Muqdisho waa inay u gudbisaa shaqaalaha loo baahanyahay Guddiyada Xaafadaha oo awood loo siinaayo magacowga shaqaalaha kor lagu tilmaamay iyadoo la fiirinayo caddallad iyo siinnaan, sida xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanku ay qorayaan.

Qodobka 3aad

Guddiyada Xaafadaha waxaa lagu amrayaa inay qoraan magacayada dadka joogtada ah ee Xaafadaha deggan iyagoo tilmaamaya kuwa shaqeeya iyo kuwa aan shaqeenin.

Qobodka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka la saxiixo waxaana lagu dhigi doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Luuliyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*

GUDDONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 9 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**19 Luuliyo 1973.**

**Sharci ku Saabsan Ciribtirka Fasaadka.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshadii 1d ee Kacaanka 21d Oktobar 1969 xubinta « A » qeybta 5d oo ku saabsan ciribtirka fasaadka iyo wax alla wixii xumaan u keeni kara mujtamaca iyo sharafta Qaranka;

ISAGA OO ARKAY sharciga ciqaabta qodobadiisa ku saabsan khamriga;

ISAGA OO ARKAY sharciga shaqaalaha Dawladda iyo ka wakaaladaha madax banaan;

ISAGA OO ARKAY sharciga lamb. yahay 46, taarikhdisuna tahay 3 Marso 1970 kuna saabsan xashiishka iwm;

ISAGA OO ARKAY inay tahay lagama maarmaan in sharci la sameeyo ku saabsan soo saaridda, ganacsiga iyo cabidda khamriga, si laysu hor taago, loona ciribtiro dhibaatada iyo xumaanta uga imaan karta mujtamaca iyo howsha Dawladda;

ISAGA OO TIXGELINAAYA go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka ee soo baxay 6 Luliyo 1973;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1

Waxaa la amray in la xiro meel alla meeshii khamri lagu sameeyo Wadanka gudahiisa marka laga reebo Warshadda Jowhar.
Ruqsad kasta oo hore loo bixiyay, kuna saabsaneyd soo saaridda khamriga waa la burriyay.

Qodobka 2

Khamriga Warshadda Jowar sameysc waa in dibedda loo iib geeyo wixii Wasaaradda Dalxiiska laga iibiyo mooyee.

## Qodobka 3

Qof alla qofkii masaul ah oo Dawladda (Pubblica Amministrazione) shaqo u haya, hadduu khamriyacab noqdo oo shaqadiisa ka bixi waayo ama fawaaxish sharafta iyo magaca dalka dhaawaceysa ku kaco, shaqada gudeheeda ama dibedeeda, waa in shaqada dawladda laga saaro, daraja kasta ha lahaadee.

Dembiga kor lagu soo sheegay, ee sharafta ama magaca dalka wax u geysanaya waa inuu ahaaddaa ku maxkamadda Badbaadinta Dalka xukun ku caddeysay.

## Qodobka 4

Dadku khamrigu diloodey (Addicts) oon deyn karin, laguna caddeeyey qodobada 55, 166 iyo 175 sharciga ciqaabta, waa in meel lagu xannaaneeya laguna daaweeya.

## Qodobka 5

Qof alla qofkii ku xad gudba sharcigaan qodobkiisa (2) waxaa lagu qaadaya sharciga ciqaabta (Penal Code).

Qofka ku xad gudbay qodobka (2) ee sharcigan, haddu yahay shaqaale dawladeed, waxa lagu qaadi go'aan edbin ah (sanzioni disciplinari).

Qof alla qofkii ku xad gudba sharcigan, qodobkiisa (1), waxa lagu qaadaya qodobka 4d ee sharciga lambarkiisu yahay 46, soona baxay 3 Marso 1970.

## Qodobka 6

Waxa la amraya qof kasta inuu dhawro ilaaliyana hirgelinta sharcigan.

Xubnaha dawladda ee ku shaqo leh hirgelinta sharcigan, Boliska iyo Ciidamada iyo ciddi kale ee ku shaqa leh, waa inay aad u ilaaliyaan hirgelintiisa.

## Qodobka 7

Sharci kasta oo khilaafsan ama ka hortegaaya sharcigan, waa la buriyay.

Qodobka 8

Sharcigani wuxuu dhaqan gelaayaa waqtigii la saxiixo ka dib, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Luuliyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
24 Abrile 1973, L. 78.

Magacaabid Garsooreyaal.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;
MARKUU ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 1 ee 21kii Oktobar, 1969;

MARKUU ARKAY Dikrii 12 ee 25kii Oktobar 1969 ee Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Dikrii sharciyeed tiro 3 ee 12kii Jun, 1962 sharciga Nidaamka Maxkamadaha iyo beddelaadihii lagu sameeyey;

MARKU ARKAY Qodobka 7ad ee sharciga tiradiisu tahmay 14 ee 15kii Ogos, 1966;

FIIRINAYA baahida xagga danta shaqada in la sameeyo magacaabid iyo beddelaado garsoorka iyo Diinta;

DIKRIIS:

Qodobka 1.

In la sameeyo magacaabidda garsooreyaasha ee soo socota oo laga bilaabo 1da May, 1973:

1. Dr. Salax Axmed Sef — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Xamar.
2. Dr. Cabdullahi Muse Yusuf — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Shabeelaha Dhexe.
3. Cusman Yusuf Warsame — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Nugal.
4. Dr. Cabdiraxman Cilmi Cigal — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Mudug.
5. Dr. Sharif Xaji Dhere — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Shabeelaha Hoose.
6. Dr. Cabdiraxman Xusen Samattar — Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka — Hiran.
7. Ibrahim Cali Cateye — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Jubbada Sare.
8. Moxamed Jamac Bodle — Guddoonmiye Maxkamadda Rafcaanka — Bosaso.

9. Moxamed Shekh Xusen — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Burco.

10. Xusen Shekh Cabdiraxman — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Xamar.

11. Cabdiraxman Diriye Xusen — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Shabeelaha Hoose — Marka.

12. Xusen Farax Hilowle — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Jubbada Hoose.

13. Yasin Xaji Xusen — Guddoomiye Maxkamadda Rafcaanka — Jubbada Hoose.

14. Shekh Adan Moxamed — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Jubbada Sare.

15. Shekh Cali Salad Shekh Cabdi — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Nugal.

16. Cabdullahi Dahir Barre — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Burco.

17. Moxamud Shekh Farax — Guddoomiye Maxkamadda — Degmad — Xamar.

18. Moxamud Axmed Moxamed — Guddoomiye Maxkamadda Degmada — Marka.

19. Shekh Moxamed Xusen — Guddoomiye Maxkamadda Gobolka — Shabeelaha Dhexe.

Qodobka 2.

Iyadoo islamarkiiba hirgelidoonta waxa la sameeyey magacaabidda iyo beddelaada soo socota ee Garsooreyaasha:

1. Dr. Cabduraxman Dahir Cajab — waxa laga beddelay Maxcaanka Jubbada Hoose uu Garsoore ka noqon doono.

2. Warsame Moxamed Cabdulle — waxa laga beddelay Maxkamadda Gobolka Jubbada Hoose loona beddelay Maxkamadda kamadda Rafcaanka Burco loona beddelay Maxkamadda Raf-Rafcaanka Xamar uu Garsoore ka noqon doono.

3. Moxamed Axmed Cumar — waxa laga beddelay Maxkamadda Gobolka Jubbada Sare loona beddelay Maxkamadda Rafcaanka Xamar uu Garsoore ka noqon doono.

4. Cali Xaji Nur — waxa laga beddelay Maxkamadda Degmada Burco loona beddelay Maxkamadda Degmada Hargeysa uu Garsoore ka noqon daano.

5. Moxamud Cabdi Axemed — wuxuu noqon doonaa Garsoore Maxkamadda Degmada Burco.
6. Moxamed Xaji Yusuf — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxmadda Degmada — Lughaya.
7. Moxamed Sharkir Axmed — wuxuu noqon doonaa Guddoodoomiyaha Maxkamadda Degmada Shekh.
8. Moxamed Cumar Farax — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Xaradhere.
9. Moxamed Xasan Ducale — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Cabudwaq.
10. Cabdulqadir Cabdullahi Salax — wuxuu noqon doona Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Jalalaqsi.
11. Moxamed Cabdiraxman Naleye — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Celwaq.
12. Moxamud Moxamed Cabdi — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Wajid.
13. Moxamed Salax Axmed — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Badhadha.
14. Cabdisamad Xasan Sacid — wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Dolow.
15. Cabiraxman Moxamed Cisman wuxuu noqon doonaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Yed.

Qodobka 3.

Dikriigan waxa lagu soo saari doonaa xaashida rasmiga ah.

Muqdisho, 24 Abrile 1973.

*Sareeye Gaas Moxamed Siyad Barre*
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

*Dr. Cabdisalam Shekh Xusen*
Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

*Moxamed Yusuf Weyrax*
Xoghayaha Wasaaradda Lacagta

*VISTO e registrato - Reg. n.2, foglio n. 118.*

*Mogadiscio, li 28 Maggio 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER L. 79 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
18 June 1973.**

**Xeer Dowladeed oo ku sabsan dhismo safaarooyin cusumb.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xeerkii t. 14 soo baxay 3 Juunyo 1962kii kuna saabsanaa Dhismaha Dawladda iyo wixii beddelaad ah ee lagu sameyey;

ISAGOO ARKAY Xeerkii Guddoonshaha Jamhuriyadda (Decreto Presidenziale) soo baxay 20kii marso 1965kii kuna saabsanaa nadaamka iyo dhismaha Xafiisyada ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dibedda;

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in la dhiso Safaaradda - ha cusub;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

WUXUU XEERAYA

Qodobka 1aad

*Dhismo Safaarado cusub*

Waxaa la abuurayaa Safaarado cusub oo laga dhisi doono Dalalka soo socda:

1. « KUWEED » (Kuwait).
2. « ISWEDEN » (Sweden).

Qodobka 2aad

Xoghalalasha Wasaaradaha: Arrimaha Dibedda iyo Lacagta, waxay qaadi doonnan talabooyinka idaariga ah ee loo baahan yahay si loo fuliyo xeerkaan.

Qodobka 3aad

*Hirgelinta Xeerka*

Xeerkani wuxuu hirgeli daana marka laga soo saxiixo Guddoon-

shada Golaha Sare ee Kacaanka waxanna lagu soo saari doono faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Juunyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle Cumar Carte Qaalib*
Xoghayaha Wasaaradda Arr. Dibedda

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 87.*
*Mogadiscio, li 14 Luglio 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER L. 80 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 23 Juunyo 1973.**

**Dallacsiin Gaashaanle Dhair Moxamed Dirie.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qaynuunkii lam. 2 ee 23kii Disambar 1972, iyo sharcigii hoose ee la xiriirsanaa hannaanka iyo dhismaha Cidanka Boliska;

ISAGOO AQOONSADAY Sarkaalka hoos ku magacaaban in la dallacsiiyey iyadoo la tixgelinayo kartidiisa ilo wuxuu mutaystay;

ISAGOO HUBIYEY in ya jago ka bannaan yahay Talagalka Tiro Joogtada ee Saraakiisha Boliska;

ISAGOO DHEGEESTAY Ra'yigii Xaghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha.

## WUXUU XEERAYA

### Qodobka 1

In Gaashaanle Dhair Moxamed Diriye la dallacsiiyey lana gaarsiyey darajada Gaashaanle Dhexe marka laga bilaabo 1da Jun 1973 kuna hirgelaysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha.

### Qodobka 2

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa faafinka rasmiga ah.

Muddisho, 23 Juunyo 1973.

*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

*Kusimaha Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha

*Takh. Maxamed Yusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Lacagta

*VISTO e registrato - Reg. n. 3, foglio n. 7.*
*Mogadiscio, li 22 Luglio 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Qaali Jaamac Maxamed u usoo qortay arji qaybta Dhimaha iyo Dhulka 14-6-1973, uu ku weydiisanayey.

dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktobar, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg kuna fadhiya 20x20 = 400 dmh.

Soohdin: Waqooyi Gabal dhul lam. 23; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Gabal dhul lam. 30.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga milaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 28 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Kusime Inj. Cabdikarin Cige Guled*

*(114)*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nakua Aden Carale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 12-4-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 13,5x13,5 = 182,25 mdh.

Soohdin: Waqooyi Xaji Moxamed; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Isakh.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga milaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 28 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Kusime Inj. Cabdikarin Cige Guled*

NUGUL

# *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Axemed Moxamed Aaden uu soo qortay arji qaybta dhismaha iyo dhulka 21-4-173ka.

Uu ku weydisanayo dhul dhismo dowladeed kuna yaal Baydhaba

Faxadda Salaamey, oo lex qiyaa afar gees kuna fadhiya mq. 488,45.
Waqooye: Waxaa ka xiga Jid yar.

Galbeed: Waxaa ka xiga Guriga Edebo Moxamed Moxamud iyo Xaawo Shirwac.

Koofur: Waxaa ka xiga Jid year.

Bari: Waxaa ka xiga Jid weyn.

Qofkii doonayaa wuxuu si fiican uga arki kara waqshamada dhulka oo taal Xafiiska Guddoonshaha Guddiga degmada Baydhaba, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) malmood, oo laga billaba maanta lagu naadshay derbiyadda naadadda lagu dhejiyo arrimaha ka ka soo baxa dowladda, meelaha oo ah Xafiiska Guddomiyaha guddiga degmada Baydhaba iyo Xafiiskii Horse ee Municipiyadda.

Baydhaba, 31 Maggio 1973.

Waxaa saxiixay Gashanle
*Cabdulqadir Cabdulle Berkaan*
Guddonshaha Guddiga Degmada Baydhaba

*(116)*

---

## MAXKAMADDA GOBALKA BENADIR

---

Waxaan aqriyey decdaan;

Marka an arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bangiga Ganacsiga Somalida, waxaan ogaadel iney shaqadayda tahay;

Arkay qodobka 69 D. L. 9-965 N. 2;

Waxaan codeynaaya dhumidii bugga lacagta (ammortamento Libretto) n. 2594 Shs. So. 700 (settecento) todoba boqol.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugaas ninka la yirahdo Maxamed Xaaji Cali, mudo 30 berin ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale oo dawladda, haddan qoldaan qolkale oo sheeganaayaa usan jiran.

Waxaa kaloo la codsanayaa in Buggaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qofkale oo ka sita, kahaysta wakaalad shaki aan lahayn, iyodoo la sugaayo 30 kaas beri oo kor ku qoran.

GUDOMIYAHA MAXKAMADDA

*Dr. Xusen Shekh Cabduraxmaan*

*(117)*

---

DAXWAD MADANI LAMBARKEEDU 4kii 1973

**MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER**

---

MAXAMED XUSEN CILMI — DACWOODE

LID AH

BANKIGA KAYDSIGA IYO AMAAHDA (LANTA BURCO)

DACWEYSNE

XUKUM (DECREE)

Dacwoode wuxu soo qoray weedin u donayo in jeega wrageea lambarkiisu yahay 10077, lacagtiisu tahay 7,000/- shilin taarikhdiisuna 7-3-1973 oo uu laha Dacwoode Maxamed Xuseen Cilmi in uu ka luu-may.

Bankiga kaydsiga iyo Amaahda (lanta Burco) waa hubiyeen iyago soo qoray warqadda lambarkedu yahay 000127 oo taarikhduna 19-4-73 iin jeega wareega ee lambarkiisu yahay 10077 uu ninka kor ku qoran ka lumay.

Maxkamaddu waxay xukumtay oo ay aqonsatay in jeega wareega ee lacagtiisuna ahayd 7,000/- (Todoba Kun) shilin in la tirro, iyado la tiixraco qodobka 27 Legislative Decree Law N. 2kii 9th September 1965, oo lacagta looceeliyo ninka kor ku qoran, 30 (sodon) casho dabadeed

xukunka lugu qoro Official Bulletin. Dacwoodduhuna waa inuu bixiiyaa wixii kharash ah.

Amarkega iyo saxeerega iyo shabadii Maxkamadda maanta oo tarikhdu tahay 9-7-1973.

Duddomiyaha Maxkamadda Gobolka, Burco
*Cabdullahi Dahir Bare*

*(118)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA EE BURCO

---

Dacwad M/A L. 1-73.

*Yuusuf Maxamed Aadan oo ka hor jeeda Bangiga Kaydsiga iyo Amaahda Laanta Burco*

AMAR: Ayadoo dacwooduhu uu ku dhaartey inuu ka lumay buugga kaydsiga ee Lamberkiisu yahay 1551/7 oo ku qornaa magaciisa taariikhdu markay ahayd 1972 bishii ugu dambeysay dhexdeeda qiimahiisuna ahaa 3004/- shilin ayadoo uu ogeysiiyey arrintaas Bangiga Burco dabadeedna Bangigu ka codsaday Maxkammaddu inay u ogolaato inuu siiyo Bankigu lacagtaas warqaddiisii L. 000032 taariikhdeeduna ahayd 21-1-1973.

Maxakammaddu waxay amar ku bixineysaa waxyaalaha soo socda.

1. Buugga aan kor ku soo sheegney in la baabiiyo.
2. In baabiintaas lugu faafiyo Official Bulletin.
3. In la siiyo lacagta ku qorneyd buuggaas oo tiradeedu ahayd 3004/- shilin Soomaaliyeed ninka la yiraahdo Yuusuf Maxamed Aadan markay dhammaato 30 casho faafinta ka dib.

Kharashkana dacwoodahaa qaba.

Burco, 5 Juunyo 1973.

*Cabdillaahi Daahir Barre*
Guddoomiyaha MaxKammadda Gobolka, Burco